


# Xannaanaynta Chromebook

Ardaydu waxay mas'uul ka yihiiin daryeelka guud ee Chromebook ee uu soo saaray maamulka Portland Public Schools. Ardayda leh Chromebooks jabay ama u shaqeyn waaya si munaasab ah, ay ka lumaan, ama laga xaday waa inay dhibka ku soo wargaliyaan macalinkooda ama ay soo diraan email ay kusoo dirayaan support@pps.net durba sida ugu macquulsan si arinka si munaasab ah wax looga qabto.

Chromebooks ay degmadu leedahay waa inaan loo qaadin adeeg kombuyuutar oo dibadda ah si loogu soo sameeyo dayactir noocii uu ahaadaba ama daryeel. Ardaydu waa inay ula tacaamulaan Chromebook sidii agab qiime badan ayna mar walba ku xareeyaan Chromebook-ga meel bedqabta markii aan la isticmaaleyn.

## Taxaddarka Guud

- Waa inaan cunno ama cabbitaan loo dhaweyn Chromebook-gaaga.
- Fiilooyinka galoolka ah, waayarada, iyo aaladaha dukumiintiyada lagu keydsho ee laga soo bixin karo waa in si taxaddar leh loo galiyo godka ay ka galaan ee munaasabka ah.
- Tuuridda Chromebook-gaagu waxay ka dhaawici kartaa gudaha iyo dhanka bannaanka ah.
- Chromebook waa inaan lagu ag isticmaalin ama aan lagu ag xareyn xayawaanada rabbaayada ah.
- Chromebooks waa inaysan dushooda waxba ku qornaan, aan waxba lagu dul sawirin, aan xaashiyo lagu dul dhajin, iyo calaamado.
- Waxyaabaha culus waa inaan marna dusha laga saarin Chromebook.
- Ha amaahin Chromebook-gaaga arday kale ama shakhsii.
- Ha u dhigin Chromebook-gaaga kuleyl ka badan 100 dhigrii ama kuleyl ka yar 32 dhigrii.



## Qaadashada Chromebooks

- Mar walba u safri Chromebook si taxaddar leh si dhaawac uusan u gaarin.
- Ku qabo Chromebook (ayadoo daboolku u xiran yahay) labo gacmood markii aad qaadeyso.
- Waligaa haka qaban Chromebook saashada markii aad kor u qaadeyso ama ha qaadin Chromebook ayadoo saashadu ay furan tahay.

## Daryeelka Saashada

- Saashada Chromebook dhaawac ayaa soo gaari kara hadii loo adeegsado waxyaabo culus, hadii la xoqo, hadii loo adeegsado waxyaabaha dareeraha ah ee wax lagu nadiifio ee wax mila qaarkood, iyo dareereyaal kale.
- Ku nadiifi saashada kaliya maro jilicsan oo qalalan oo dunta adag ay ku yar tahay ama maro ka hortagta korontada danabka ah ee walxaha markii laysku. xoqo dhalata. Waligaa ha adeegsan wax leh aalkolo, beys ama dareere qarmuun, dareereha guryaha lagu nadiifsho ee windex/ama biyo, ama dareere kale oo wax mila oo aad u daran, ama inaad u isticmaasho marada wax lagu nadiifsho/ama istiraashooyin inaad ku nadiifiso Chromebook-gaaga.
- Ha kutaagsan ama ha saarin cadaadis dusha sare ee Chromebook markii uu xiran yahay.
- Waxba haku mudin saashada waxaasoo calaamad u yeelaya ama xoqaya sagxadda saashada.





## Furidda Chromebook

- Fur Chromebook markii uu saaran yahay meel sagxad ah oo fidsan sida miis ama miiska iskoolka.
- Si aad u furto Chromebook, isticmaal hal gacan oo aad kula qabanayso kiiborka miiska. Uisticmaal gacanta kale inaad kufurto saashada adigoo qabanaya qarka saashada (inta dhexe) ayaarna u dhaqaajinaaya oo u furaaya saashada.
- Ha isku dayin markii aad fureyso inaad saashada geyso meel ka durugsan meeshaa ay ku joogsanayso ee loogu tala galay inay ku istaagto maadaama ay saashadu jabayso hadii la qasbo.

## Xiridda Chromebook

- Xaqiji in waxba aysan dul saarneyn kiiborka ka hor inta aadan xirin. Waxyaabo hadii ay saaran yihiin kiiborka dushiisa saashadaha ayay jabin karaan ama faseexadaha ayay dhaawaci karaan.
- Xir saashada kaliya markii Chromebook uu dul saaran yahay sagxad fidsan sida miis ama miiska iskoolka.
- U xir Chromebook aayar adigoo isticmaalaya labo gacmood-mid walbana uga haya gees ka mid ah labada gees ee saashada.

## Bareeska Korontada

- U gali oo uga soo bixi bareeska korontada si taxaddar leh.
- Meelna ha u qaadqaadan Chromebook-gaaga ayadoo bareeska korontadu uu ku mudan yahay .
- Chromebook waa inaan la isticmaalin ayadoo fiilada galoolka ah ee korontadu ay ku mudan tahay marka laga yaabo in fiilada galoolka ah ay dhib keeneyso.

## Calaamadaha Hantida

- Dhammaan Chromebooks waxaa lagu calaamadayn doonaa calaamad hanti oo muujineysa inuu leeyahay Portland Public School.
- Calaamadaha hantida waa inaan wax laga baddalin ama aan sina loo qujeyn.



PORLAND PUBLIC SCHOOLS

**OTIS** Office of Technology & Information Services